Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
DIVISION OF CHILD SUPPORT (DCS)

Macluumaad Meelmarin Taageero Caawimo-la'aan ah

Nonassistance Support Enforcement Information

(Cutubyada 26.18, 26.23, 34.05, 74.20, iyo 74.20A RCW)

Hayso foomkan; wuxuu wataa macluumaad sharci oo muhiim ah kuna saabsan keeska taageerada ilmahaaga.

Dhinacyada Amarkaaga Taageero

Labada dhinacyo ee amarkaaga taageero ayaa ah waalid aan ilmo haynin iyo waalidka ilmaha haya ama qof ilmuhu gacantiisa u ku jiro. Waalidka aan ilmaha haynini waa qofka ay qasab ku tahay inuu baxsho taageero. Waalidka ilmaha Hayaa amase qofka ilmaha hayaa waa qofka ay caadi ahaan carruurtu ula nool yihiin. Waalidka ilmaha haya iyo waalidka aan ilmaha haynin labadoodaba waxa laga yaabaa in looga baahdo inay bixiyaan hoos imaad caymis caafimaad iyo/taageero caafimaad oo loogu talagalay carruurta.

- Taageerada caafimaad waxa ku jira qayb saami oo kharashyada caafimaad ee aan la cayminin iyo qayb qaddar xilliyeed (lacag kaash ah bixinteed) haddii loogu baahdo amarkaaga marka aan caymiska caafimaadka aan la bixin.

QAYBTA TAAGEERADA ILMAHA

Qeybta Taageerada Ilmaha (DCS) waxay xafiisyo ku leedahay meelo ku yaalla gobolka. Xafiiska DCS wuxuu maareeyaa oo meelmariyaa kiisas taageero ilmo. Si uu xafiiska DCS u meelmariyo amar taageero, waa in mid ka mid ah dhinacyada amarka uu qoraal ahaan u soo codsado adeegyada meelmarin taageero.

Haddii amarkaaga taageero rabo lacag-bixin soo marta Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (fiiri qeybta soo socota) balse aaanu xafiiska DCS helin codsi adeegyo, xafiiska DCS wuxuu kiiskaaga u furi doonaa Adeegyada Lacag-bixineed oo Qura . Xafiiska DCS wuxuu siiyaa kiisaska Adeegyo Lacag-bixineed oo Qura (PSO) habeyn lacag-bixinneed iyo diiwaan hayn qura.

Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington

Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR) waa qeyb ka mid ah xafiiska DCS ee haysa diiwaannada, qeybisana lacag-biximaha taageero. Xafiiska DCS wuxuu amarkaaga taageero ku qori doonaa Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR) marka uu dhaco mid ka mid ah labada wax ee soo socda:

1. Mid ka mid ah labada dhinac ee amarkaaga taageero oo warsada xafiiska DCS adeegyo meelmarin taageero ilmo.
2. Amarkaaga taageero ka rabo waalidka aan ilmaha haynin inuu ku bixiyo taageerada Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR).

Waxyaabaha ay Tahay Inaad Sameyso

Marka aad xafiiska DCS warsato adeegyo meelmarin taageero, waa inaad:

1. Xafiiska DCS u dirtaa dhammaan lacag-biximaha aad sida tooska ah uga hesho waalidka aan ilmaha haynin. Xafiiska DCS waa inuu haystaa diiwaan dhammaan lacag-biximaha si uu uga shaqeeyo kiiskaaga. Haddii aad heshay lacag-bixin taageero ka hor inta aadan warsan adeegyada xafiiska DCS, waa inaad siisaa xafiiska DCS caddeyn iis-gareyneysa dhammaan lacag-biximahaas. Marka aad u soo dirto DCS lacag-biximaha aad ka heshay waalidka aan ilmaha haynin, xafiiska DCS wuxuu qaddarkaas ku buuxshaa kaarkaaga deynta ee DCS amase wuxuu xafiiska DCS qaddarkaas dhiggaa koontadaada lacag dhiggid tooska ah.
2. U sheeg xafiiska DCS haddii aad beddesho cinwaankaaga amase taleefan lambarkaaga. Xafiiska DCS wuxu u baahan yahay macluumaadkan inuu inuu adiga kaala soo xiriiro kiiskaaga. Waxa laga yaabaa in xafiiska DCS ogeysiisyo sharciyeed kuugu soo diro boosta heerka koowaad.
3. Isla markiiba u sheeg xafiiska DCS haddii aad dib ugu noqoto waalidka aan carruurta haynin amase carruurta meelkale u wareegaan si ay ugu noolaadaan. Waa inaad xafiiska DCS siisaa macluumaad dheeraad ah marka lagu warsado.
4. U sheeg xafiiska DCS haddii aad qoroto looyar amase hay'ad birifaati ah inay kuu qaaddo taageeradaada. Waa inaad siisaa xafiiska DCS magaca iyo cinwaanka looyarka iyo hay'adda birifaatiga ah. Waa inaad u sheegta xafiiska DCS waxyaalaha ay ka shaqeynayaan looyarka amase hay'ad birifaatiga ah.
   a. Waxa laga yaabaa in xafiiska DCS aruursho taageeradaada marka uu looyar amase hay'ad birifaati ihi isku dayayaan inay aruurshaan.
   b. Haddii aad qabsato looyar inuu beddelo amarkaaga taageero, adiga amase looyarkaagu waa inaad ogeysiis u soo dirtaan waalidka aan ilmaha haynin iyo xafiiska DCS.
5. Waxaad siisaa xafiiska DCS amase ka caawi xafiiska DCS inuu helo koobbiyo dhammaan amarada taageero ee loo qoray kiiskaaga.

Rabitaannada Helidda Adeegyo Meelmarin Taageero Caawimo-la'aan

Haddii aadan haysan amar hayn ilmo oo sharci ee carruurta aad u codsaneyso adeegyo taageero ilmo, waa inaad caddeysaa in aadan ilmaha si sharci darro ah kaga haysan qofkii ahaa carruur hayaha sharciga ah.

Xafiiska DCS wuxuu qaata $35 lacag ah sannad kasta oo federal xisaabeed ee uu xafiiska DCS kuu soo diro $550 oo taageero haddii adigu **aadan weligaa qaadan** Caawimaad Ku-meelgaar ah ee Qoysaska Baahiyeysan (TANF), TANF Qabiil, amase Caawimo Qoysas Ilmo Haysta (AFDC) eecarruur kasta. Sannad xisaabeedku wuxuu bilowdaa Oktoobar 1deeda oo wuxuu dhammaadaa Sibtember 30keeda sannad walba. DCS waxay kaaga qaaddaa urjadan(fii-gan) iyada oo ka reebta $35 ka ururinta taageerada kadib markay DCS kuu soo dirto $550 ee ugu horraysa. Haddii aad leedahay hal kees wax ka badan sababta oo ah carruurtaada ayaa leh aabbayaal kala duwan, waxa dhici karta in lagaa qaado wax kabadan hal fii sannadeed. Haddii aad heshid TANF, TANF Qabiil, amase Caawimada AFDC ee Dawlad kale, waa inaad xafiiska DCS u soo dirtaa caddeyn, sida oraah dhaarsan oo ka timid hay'ad kaalmo dadweyne oo dawlad kale amase koobbi diiwaankaaga kaalmada DCS. Xafiiska DCS wuxuu sii qaadi doonaa lacagta illaa intaan ka heleyno caddeyn. Haddii bixinta lacagta ujrada ee ah $35 ay dhibaato adag u keenayso qoyskaaga, waxaad weydiin kartaa DCS ka reebitaan lagaa reebo codsiga Guddiga Shirka.

Adeegyo Meelmarin Taageero

Haddii aad haysato amar taageero oo qeexa qaddarka taageero, xafiiska DCS wuxuu isku dayi doonaa inuu soo aruursho qaddarkaas. Inta badan Xafiiska DCS ma xisaabiyo mana aruuriyo dulsaarka fuula amarkaaga. Kiisaska qaarkood, xafiiska DCS waa inuu siiyaa ogeysiis labada dhinac ee amar taageero inta ka horeysa bilowga hawsha aruurinta.

Haddi aadan haysan amar taageero amase amarkaaga taageero khuseynin taageero ilmo iyo taageero caafimaad labadaba, xafiiska DCS wuxuu siin doonaa oggeysiis labada dhinac ee amar taageero.

1. Oggeysiikan, wuxuu xafiiska DCS ku qeexi doonaa qaddarka taageero ilmo iyo taageero caafimaad ee loo baahan yahay. Xafiiska DCS wuxuu qaddarka taageerada cunuga ku saleyn doonaa isugeynta dakhliga labad dhinac iyo tirada ilmaha ay khuseyso.
2. Amarkaagu waa inuu uga baahdaa waalid kasta oo xilku saaran yahay inuu bixiyo hoos imaadka caymiska caafimaad marka hoos imaadku laga helayo loo-shaqeeyaha waalidka ama ururka shaqaale wax aan ka badnayn boqolkiiba 25 waajibaaka taageerada aasaasiga ah ee waalidka xilkiisa aya tahay.
3. Amarka waxa dhici karta inay ku jiraan waajiibaad taageero caafimaad oo lagu bixinayo qaddar xilliyeedka ee aad adigu bixiso ama Gobolka haddii caymis caafimaad uuna bixin waalidka.

Haddii aanu amarkaaga taageero goynin qadar taageero oo cayiman laakiin sheego foormula lagu go'aamiyo qadarka, xafiiska DCS wuxuu siin doonaa Ogeysiis Taageero Maqan labada dhinac ee amarkaaga taageero.

1. Ogeysiiskan, wuxuu xafiiska DCS ku qeexi doonaa qadar taageero oo cayiman. Labada dhinac ee amarkaaga taageero midkood ayaa warsan kara dhageysi inuu ka murmo qadar taageero ee uu xafiiska DCS cayimay.
2. Xafiiska DCS wuxuu isku dayi doonaa inuu labada dhinac la gaaro heshiis xagga qaddarka taageero ee amarkaaga taageero.

Marka qadarka taageero la cayimo iyo haddii xafiiska DCS yaqaanno loo-shaqeeyaha waalidka aan ilmaha haynin, wuxuu xafiiska DCS siin doonaa loo-shaqeeyaha ogeysiis Dakhli Ka-jarid ee Taageero. Ogeysiiskani wuxuu loo-shaqeeyaha ka rabaa inuu ka-jaro taageero dakhliga amase mushaharka waalidka aan ilmaha haynin. Haddii aanu xafiiska DCS aqoonin loo-shaqeeyaha waalidka aan ilmaha haynin, wuxuu xafiiska DCS isku dayi doonaa inuu helo meelaha ay ka yimaaddaan mushaharka amase dakhliga wuxuuna isku adyi doonaa inuu soo aruursho taageeradaada.

Haddii u amarkaaga taageero u wato uga baahnaan taageerada caafimaad ee carruur, DCS ayaa isku dayi doonta inay fuliso farritaanna. Ficiladda ay DCS qaadi doonto waxay ku xiran tahay waxyaabaha amarku farayo.

1. Haddii aad haysato amar taageero oo raba in waalidka aan ilmo haynin bixiyo hoos imaad caymis caafimaad, bixiyo qayb saami u dhigan oo ah kharashyada caafimaadka ee aan cashuurta lahayn, ka-goymaha, iyo la-biximaha, ama bixiyo qaddar doolar oo dheeraad marka waalidka ilmaha (carruurta) aan hayn uuna lahayn hoos imaad caymis caafimaad,xafiiska DCS wuxuu isku deyi doonaa inuu meelmariyo rabitaankaas ah taageero caafimaad.
2. Haddii aad haysato amar taageero oo aan rabin in waalidka aan ilmo haynin bixiyo caymis caafimaad ee loogu talogalay carruurtaada, xafiiska DCS wuxuu isku dayi karaa in uu bedelaad ku sameeyo amarkaaga.
3. Haddii aad haysato amar taageero oo raba in adigu bixiso hoos imaad caymis caafimaad, oo aad bixiso qayb saami-u-dhigan oo ah kharashyada caafimaadka ee aan cashuurta lahayn, ka-goymaha, iyo la-biximaha, ama bixiso qaddar xilliyeedka caymiska caafimaadka waalidka kale haddii aadan bixineyn hoos imaad caymis caafimaad ,xafiiska DCS wuxuu isku deyi doonaa inuu meelmariyo rabitaankaas ah taageero caafimaad.

Haddii aad u hayso caymis caafimaad carruurta, wa inaad siisaa DCS caddayn ah hoos imaadka caymiska. Waad soo buuxin kartaa oo aad soo celin kartaa foomka ***Macluumaadka Caymiska Caafimaadka ee Waalidka Ilmaha*** (Carruurta) Haya si uu u noqodo caddayn.

Haddii aad leedahay hoos imaad caymis caafimaad oo aadan rabin in DCS ay meel-mariso yahay ee taageerada dhexaadka loo baahan yahay ee amarkaaga taageero, waa inaad siisaa DCS caddayn hoos imaad ah oo DCS aad ugu sheegtaa qoraal inaadan rabin meel-marinta farritaannada taageerada caafimaadka.

Haddii ayna hooyada iyo aabbuhu isguursan waligood, oo:

1. Midkood ama labaduba ayna saxeexin ***Caddeynta Aabbanimo***, waxa qasab ah in maxkamad dawladeed amase qabiil go'aamiso aabbaha sharciga ah. Xafiiska DCS wuxuu kiiskaaga u diri doonaa Looyar wax dacweeya, maxkamad qabiil, amase xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud inay ficil ka qaadaan.
2. Labaduba saxeexaan oo ***Caddeynta Aabbanimo***, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS uu helo amar taageero iyadoon la qaadin ficil maxkamadeed.

Haddii uu dhinaca kale ee amarkaaga taageero warsado xafiiska DCS inuu sidaas sameeyo, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS bixiyo adeegyada buuxa ee meelmarin taageero xitaa haddi aadan adigu rabin adeegyadaas.

Haddii aanay labada dhinac ee amar taageero midkoodna ku nooleyn Dawladda Washington, xafiiska DCS wuxuu bixin doonaa taageero haddii labada wax ee soo socdaa run yihiin.

1. Labada dhinac ee amarkaaga taageero midkoodna kama helo dawlad kale adeegyo meelmarin taageero.
2. Waalid aan ilmaha haynini wuxuu xiriir la leeyahay Dawladda Washington. Xiriirka waxa ka ku jira mushahar uu ka qaato loo-shaqeeye ka ganacsada Washington, iyo lahaansho xoolo maguurta ah ee Washington, iwm. Waa inuu waalid aan ilmaha haynini xiriir ku filan la leeyahay Dawladda Washington si uu xafiiska DCS u soo aruursho taageero.

Haddii uu waalid aan ilmaha haynin ku nool yahay dawlad kale oo aanu xiriir la laheyn Dawladda Washington, adiguna aad ku nooshahay Dawladda Washington, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS sameeyo waxyaalaha soo socda:

1. Inuu kiiska u dhidbo in laga xukumo oo uu taageero ka aruursho sharciga Dawladda Washington hoostiisa.
2. Inuu warsado dawladda uu ku nool yahay waalid aan ilmo haynin inay aruuriso taageero ilmo. Dawladda kale waxay ku hawl-gali doontaa sharigooda.

DCS ayaa ugu talagali in waalidka aan ilmaha hayn uu sameeyo biximo taageero wakhtigoodii dhaafay bil kasta. DCS ayaa ku saleysa bixintan in taageerda loo baahan yahay ee ku dajisan amarkaaga taageero iyo qadarka wadarta taageerada wakhtigu ka dhacay ee keeska lagu leeyahay.

Haddii aad haysato amar taageero oo u oggolaada xafiiska DCS inuu diro amar ah **Ka-jarid Dakhli ee Taageero**, wuxuu xafiiska DCS ogeysiiskaas u diri doonaa loo-shaqeeyaha waalidka aan ilmaha haynin (haddii la yaqaan).

Haddii aad haysato amar taageero aan u oggolaada xafiiska DCS inuu diro amar **Ka-jarid Dakhli ee Taageero**, xafiiska DCS wuxuu diri doonaa **Ogeysiis Deyn Taageero iyo Dalab Lacag-Bixineed** ee waalid aan ilmo haynin. **Ogeysiiska Deyn Taageero iyo Dalab Lacag-Bixineed** wuxuu sheegayaa qaddarka taageerada oo wuxuu siinayaa xafiiska DCS awoodda uu bixin karo **Ka-jarid Dakhli ee Taageero**.

1. Haddii aad tahay bixiyihii ay maxkamaddu amartay, xafiiska DCS wuxuu kuu soo diri doonaa koobbi oggeysiiska sheegaya qadarka taageerada. Haddii aad hesho koobbi oo aadan ku raacsaneyn qaddarka ogyeysiiska lagu sheegay, waa inaad warsataa dhegeysi.
2. Waxa laga yaabaa inuu waalid aan ilmaha haynini warsado Shir Guddi (oo ah dhageysi aan rasmi ahayn) si uu uga murmo qoddobada oggeysiiska ee sheegaya qaddarka taageero. Waxa la yaabaa inaad ka qeyb-qaadato Shirka Guddi.
3. Haddii aad warsato dhageysi oo waalidka aan ilmaha haynin warsado Shir Guddi, waxaad adigu go'aansan kartaa inaad yeelay dhageysi amase Shir Guddi.

Wixii hawl ah ee lagu dhidbayo, meelmarinayo, amase wax lagaga beddelayo amar taageero, wuxuu xafiiska DCS waxa laga yaabaa inuu dhinacyada u diro oggeysiis qoran boostada heerka koowaad. Xafiiska DCS waxa laga yaabaa inuu oggeysiiska u diro cinwaankii la-yaqaannay ee dembeeyey ee dhinacyada. Haddii uu xafiiska DCS kuu soo diro oggeysiis, waxa laga yaabaa inuu noqdo amar kama dembeyn ah iyadoon adiga laguu soo dirin oggeysiis kale. Waxa laga yaabaa in Maxkamad amase Xaakin Sharci Maamuleed (ALJ) oggolaado racfaan beddelaad ee amar taageero si otomaatik ah haddii dhinac ka baaqdo inuu ka soo xaadiro dhageysi beddelaad. Tani waa mid khuseysa arrinta xitaa haddii xafiiska DCS uu soo caddeyn kari waayo in dhinaca soo xaadiri waayey uu dhab ahaantii helay oggeysiiska dhageysiga ee loogu diray boostada heerka koowaad oo loogu hagaajiyey cinwaankii ugu dembeeyey ee la yaqaannay ee dhinaca.

Xafiiska DCS ma dhidbi karo amade ma meelmarin karo arrimo ah ilmo hayn amase ilmo soo-booqasho ee ilmahaaga.

Wakiilnimo

Xafiiska DCS iyo dhammaan xafiisyada Xeer Illaaliyaha Guud iyo xafiisyada Looyarada Dacwadaha Oogga ee la shaqeeya xafiiska DCS waxay wakiil ka yihiin Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka. Xafiisyadani midna kama wakiil ah labada dhinac ee amarkaaga taageero.

Dhegeysiyo

Cutubka Sharciga 34.05 RCW wuxuu oggol yahay in labada dhinac ee amarkaaga taageero uu ka qeyb-galo dhegeysi loo qabto amarkaaga taageero. Dhinac kastaa wuxuu ka soo qeyb-gali karaa dhegeysiga si qof ahaan ah amase si taleefan ah. Dhageysiyadu waxay saameeyaan qadarka taageeradaada. Haddii aadan ka qeyb-galin dhegeysi, waxa laga yaabaa in ALJ uu oggolaado codsiyada uu soo jeediyo xafiiska DCS amase dhinaca kale amar taageero iyadoon lagu siinin wax oggeysiis ah. Waxa laga yaabaa inaad doonto la-taliye sharci oo kaa wakiil noqda dhegeysiga.

Dabcin ama lacag dhimis
Sharciga Washington wuxuu oggol yahay taakuleynta carruurta in si ku meelgaar ah loo yareeyo haddii waalidka aan carruurta hayn la xiro ama lagu xukumo ugu yaraan lix bilood oo xabsi, jeel ama xarun asluub ah oo uusanna awood u lahayn in uu taakulaynta carruurta bixiyo. Hannaankan waxaa loo yaqaanaa dabcin ama lacag dhimis. Adiga, waalidka aan carruurta ahayn, ama DCS ayaa codsan kara lacag dhimista. Haddii lacag dhimista lagu dabaqi karo kiiskaaga, waxaad ogeysiis ka heli doontaa DCS oo sharxaya shuruudaha lacag dhimista iyo xaqa uu qof kasta u leeyahay in uu dhageysi weyddiisto haddii ay is afgaran waayaan.

Adeegyada Aruurinta
Xafiiska DCS wuxuu isku dayi doonaa inuu:
1. Soo aruuriyo taageerada hadda jirta iyo taageerada xilligeedii dhaafay (haddii ay jirto).
   - Markay hoos timaad xaalado xaddidan, waxa laga yaabaa inuu xafiiska DCS lagu waalid aan ilmaha haynin heshiis ku meel gaar ah oo u oggolaada waalidka aan ilmaha haynin inuu bixiyo lacag ka yar qadar taageerada hadda la bixiyo bishii ee ku liis-gareysan amar taageero. Lacag-biximuhu wey kordhaan markuu waqtigu sii socdoba, si uu ugu oggolaado xafiiska DCS inuu soo-ceshado taageerada hadda jirta iyo tii xilligeedu dhaafay.
2. Soo aruurin dulsaar ee taageero xilligeedii dhaafay. Xafiiska DCS wuxuu sidaas sameyn doonaa oo qura haddii aad heysato amar taageero amase go'aan maxkamad dawladeed amase qabiil oo sheegaysa wadarta dulsaarka fuulay lacagtii maqneyd.
3. Soo aruurin kharashyo xannaano ilmo, haddii taas uu rabo amarkaaga taageero.
4. Soo aruurin taageero afo/sey (alimony), haddii taas uu rabo amarkaaga taageero. Xafiiska DCS ma go'aansho qaddarka taageero afo/sey.
5. Fuliyo rabitaannada taageero caafimaad. Xafiiska DCS waxa laga yaabaa inuu aruuriyo kharashyo caafimaad oo aan la bixin (oo ay ku jiri karaan lacagta la qaddimo, lacagta la jaro, iyo lacagta haftada ah) ee ilmaha (carruurta) ku qoran amarka, isagoo isticmaalaya waxyaalaha uu u fasaxayo Cutubyada sharciga 74.20 iyo Cutubyada 74.20A RCW. Sharciga WAC 388-14A-1020 wuxuu qeexayaa kharashyada caafimaad ee aan caymisneyn . Xafiiska DCS waxa laga yaabaa inuu bixiyo **Ogeysiis Taageero Caafimaad ee Qaran** si u fuliyo waxyaabaha looga baahan yahay caymis caafimaadka/ ama la meel-mariyo bixin lacag kaash ah oo aan ka badan kharashyada qaybta saami-u-dhiganga ah ee waalidka xilkiisa ah, oo ku xaddidan boqolkiiba 25 waalidka xilkiisa taageerada ilmaha ee aasaasiga ah.
6. Fuliyo taageero waxbarasho dhaafsiisan dugsiga sare ee ilmaha sii wadanaya waxbarashadooda marka ay dhammeystaan dugsiga sare. Taageerada noocan ah waxa amri kara oo qura maxkamad dawladeed amase qabiil. Xafiiska DCS ma dhidbi karo taageerada noocan ah.

Maaha adigu inaad warsato xafiiska DCS inuu qaado hawl-gallada ku liis-gareysan qeybtan. Xafiiska DCS wuxuu ku hawl-galaa sida kiiskaagu rabo. Hase ahaatee, waxa laga yaabaa inaad hesho macluumaad cusub oo xafiiska DCS ka caawin kara aruurinta taageeradaada. Haddii aad hesho, waa inaad u soo sheegtaa xafiiska DCS. Macluumaadka soo socda ku soo dar dhammaan wixii xiriir ah ee aad la soo sameyso xafiiska DCS.
1. Magacaaga, cinwaankaaga, lambar taleefan, iyo lambar kiis.
2. Magaca waalidka aan ilmaha haynin iyo Lambarkiisa Social Security (haddii la yaqaanno)

Joojinta Adeegyada Xafiiska DCS
Haddii aad dooneysid in xafiiska DCS joojiyo bixinta adeegyada aruurinta ee buuxa, waa inaad qoraal ahaan ku warsataa xafiiska DCS. Haddii aad haysato amar taageero oo raba in waalidka aan ilmaha haynin bixiyo taageero uu soo mariyo Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR), xafiiska DCS wuxuu joojinayaa bixinta adeegyada buuxa ee aruurinta, wuxuuna kiiskaaga u beddeli doonaa mid ah PSO (adeegyada lacag-bixinta oo qura), oo wuxuu u sheegi doonaa waalidka aan ilmaha Haynin. Haddi aanu amarkaaga taageero u baahneyn lacag-bixin soo marta Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR), xafiiska DCS wuxuu xidhi doonaa kiiskaaga.
Haddii adiga amase carruurtaadu dib ugu noqdaan waalidka aan ilmaha haynin, xafiiska DCS wuxuu joojin doonaa aruurinta taageerada ee hadda. Xafiiska DCS wuxuu kuu sheegi doonaa adiga wixii is-beddello ah ee ku yimaadda noocyada adeegyada aad hesho.

Qabsasho Lacag Soo-noqosho Canshuur Dakhli Federaal, Ku Dheelli-tir Maamulitaan, iyo U-Diiditaan Baasaboor
Wuxuu xafiiska DCS u sheegi doonaa Adeegga Aruurinta Cashuuraha IRS) marka waalid aan ilmo Haynin lagu leeyahay taageero ilmo oo xilligeedii dhaafay haddii kiiskaagu buuxiyo xujooyinka soo socda:
1. DCS ayaa yaqaan waalidka aan ilmaha haynin lambarkiisa sooshal sekuuriti (social security).
2. Deynta taageerada xilligeedii dhaafay waxay u maqan tahay amar taageero.
3. Waalidka aan ilmaha haynin waxa lagu leeyahay deyn taageero oo xilligeedii dhaafay oo ah $500.00 doolar amase ka badan. Haddii xafiiska DCS uu ogaan kari waayo wadarta taageerada xilligeedii dhaaftay, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS deynta ku xaddido qaddarka aruuray tan iyo intii uu xafiiska DCS aqbalay kiiskaaga.

Adeegga Aruurinta Cashuuraha Gudaha (IRS) wuxuu lacagta soo-noqoshada canshuurta ee waalidka aan ilmaha haynin u diri doonaa xafiiska DCS si uu u bixiyo taageero ilmo waqtigu ka-dhacay .

Haddii uu waalidka aan ilmaha haynin feyl-gareeyo canshuur celin laba qof ah, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS hayo lacagta soo-noqoshada illaa lix bilood inta aanu adiga lacagta kuu soo dirin. Xafiiska DCS waxa laga yaabaa inuu hayo lacagta soo-noqoshada canshuurta si uu ugu oggolaado dhinaca kale ee canshuur la-xareeyaha inuu/inay ku dooddo saamigeeda lacagta soo-noqoshada.

Biximaha kale ee u waalidka aan ilmaha hayn u ku leeyahay dawaladda federaalka ayaa waliba laga yaabaa in la iskugu dheelli-tiro biximaha taageerada waqtigu ka dhacay.

Haddii u waalidka aan ilmaha haynin lagu leeyahay ugu yaraan $2,500.00, dawaladda federaalka ayaa dhici karta inay waalidka aan ilmaha haynin u diiddo baasabor.

Qeybin Lacag-bixineed

Waxa jira sharciyo adag oo federaal iyo dawlad ah oo khuseeya qeybinta lacag-biximaha taageero. Xafiiska DCS wuxuu isticmaalaa taariikhda la helay lacag-bixinta si uu u go'aamiyo siduu u dabbaqi lahaa qeybinta taageero ilmo. Labada dhinac ee amar taageero midkoodna ma dooran karo xilliga lacag-bixinta saameeya.

1. Wixii lacag ah ee la helo bil kasta oo laga reebo lacagta soo-noqoshada canshuurta ee ka timaadda xafiiska IRS, wuxuu xafiiska DCS marka hore ku dabbaqi doonaa taageerada hadda jirta ee bishaas. Biximaha laanta cashuurta (IRS) ayaa loo isticmaali doonaa kaliya taageerada ilmaha ee waqtigu ka dhacay.
2. DCS ayaa dhici karta inay ka reebto bixin ujro (Fii) ah $35, haddii aadan waligaa helin fuundooyinka TANF, TANF Qabiil, ama AFDC markaad tahay qof haya carruur aan qaan-gaarin. DCS ayaa qaadi doonta ujrada (fii) ka dib $550 laguugu siiyo keeska inta u dhexeysa Oktoober 1aad iyo Sebtember 30aad sannad kasta.
3. Haddii DCS ay hesho wax ka badan qadarka taageerada hadda jirta, DCS ayaa ku dari doonta qadarta lacag bixinta dheeraadka taageerda wakhtigeedii dhaafay.
4. Haddii waalid aan ilmo haynin lagu leeyahay taageero hadda jirta ee wax ka badan hal qoys, xafiiska DCS wuxuu lacagta ku dabbaqayaa dhammaan waajibaadyada taageerada hadda jirta inta aan wax lacag ah lagu dabbaqin tageerada xilligeedii dhaafay. Adiga amase waalidka aan ilmaha haynin ma cayimi karo sida xafiiska DCS u qeybiyo lacag-biximaha.
    - Waxa jira hal wax oo ka reebban Xeerka kor ku quran. Waalidka aan ilmaha haynin wuxuu u cayimi karaa qeybinta lacag-biximaha kiisaska Adeegyada Lacag-bixinta oo Qura (PSO). Kiisaska PSO waxa looga jeedaa kiisaska uu xafiiska DCS adeeyada diiwaan haynta iyo qeybinta lacag-bixinta, balse aanu meelmarin amar taageero.

Xafiiska DCS wuxuu adiga kuu soo diri doonaa lacag-bixinta taageero ee hadda jirta. Haddii aad qoroto lacag dhigid toos ah, xafiiska DCS wuxuu si toos ah u dhigi lacag-biximaha koontada baankaaga si ah Wareejinta Elektaroonikada ah ee Fuundo (EFT).

OGEYSIIS: Haddii aanad oggolaan lacag dhigid Toos ah, xafiiska DCS wuxuu si otomaatik ah kuu soo diri doonaa kaar VISA ah, oo la dhaho kaarka deynta ee DCS "DCS debitcard". Haddii aad heysato kaarka deynta ee DCS, DCS wuxuu dhigaal ka dhigayaa taageeradaada ilmo wuxuuna ku shubi doonaa kaarkaaga xalkuu kaga shubi lahaa koontadaada baanka. Kiisaska intooda badan, lacag-bixinta taageero ilmo waxa laga heli karaa koontada baankaaga amase kaarkaaga deynta ee DCS muddo ah saddex maalmood oo shaqo gudahood ka dib marka uu xafiiska DCS lacagahaas ku dabbaqo kiiskaaga. Adigu Kaarkaaga deynta ee DCS waxaad ku isticmaali kartaa meelkasta oo laga aqbalo kaarka VISA amase Mashiinnada ATM ee Ootamaatik ah. Waxaad adigu heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacag-biximaha elektaroonikada ah. Ka oggoow waxyaabaha ku saabsan doorashooyinkaaga kaleee aad ku heli kartid lacag-biximo, adigoo waca 800-468-7422 amase gala barta internet'ka ee www.dshs.wa.gov/dcs.

Waxa laga yaabaa lacag-biximaha xilligoodii dhaafay inay adiga ku yimaaddaam amase aanay ku iman.

1. Haddii adiga iyo carruurtaadu aydaan weligiin helin caawimo dawladeed, wuxuu xafiiska DCS kuu soo diri doonaa lacagta.
2. Haddii aa heshay caawimo dawladeed oo aany jirin wax deyn ah oo ku asteysan goob maxkamadeed, wuxuu xafiiska DCS kuu soo diri doonaa lacagta.
3. Haddii aad hore u heshay caawimo dawladeed, xafiiska DCS wuxuu qeybiyaa taageeradii xilligeedii dhaaftay ee la helay ka dib markii aad joojisay helidda caawimo dawladeed sida soo socota:
    a. Marka koowaad, wixii taageero xilligeedii dhaaftay ah ee adiga kaa maqan ee aan weligeedba lagu asteynin dawladda.
    b. Marka labaad taageero xilligeedii dhaaftay ee si ku meelgaar ah lagu asteeyey dawladda asteyn la sameeyey markay ahayd ama ka dib Oktoober 1, 1997, iyo ka hor Oktoobar 1, 2008, oo aan qeyb ka ahayn taageerada xilligeedii dhaaftay ee si joogta ah loo asteeyey ee lagu sharaxay qodobka d ee hoos ku qoran.
    c. Marka saddexaad, taageero kasta oo xilligeedii dhaaftay oo u maqan taageerada caafimaadkacarruurta.
    d. Marka afaraad, taageerada xilligeedii dhaaftay eesi joogta ah lagu asteeyey dawladda asteyn caawimo dawladdeed oo la sameeyey ka hor Oktoobar 1, 1997, amase la asteeyey taariikhdaas sababtoo ah deeq caawimo dadweyne oo lagu siiyey adiga bishaas.
    e. Marka shanaad, caawimo kasta ee carruurta ee ah taageero caafimaad wakhtigeeda la soo dhaafey ee lagu asteeyey dawladda.
    f. Lacagaha laga helo xafiiska IRS ee loo qeybiyo taageeradii xilligeedi-dhaaftay iyo taageerada caafimaadka xilligeedi-dhaaftay ee dowladda gobolka loo diray kahor intaan loo qaybin taageero kasta waqtigeedu dhaafay ee adiga kaa maqan.
4. Haddii waalid aan ilmo haynin lagu leeyahay lacag hore oo aan la bixinin uu u socota hal qoys, xafiiska DCS wuxuu si is-le'eg lacagta ugu qeybshaa qoysaska.

Lacag Celinta

Ayadoo la raacayo sharciga RCW 26.23.035(3) iyo 74.20A.270, DCS waxay dib adiga kaaga qaadaysaa lacag-bixinada dheeraadka ah iyo lacag bixinada laguugu soo diray si khalad ah.

1. Waa in aad soo celisid lacag-bixinada DCS ay kuu soo dirto haddii:
   a. DCS ay lacagtu kuugu soo dirto si khalad ah.
   b. DCS ay kuu soo dirto lacag badan marka loo eego tan waalidka ilma hayaha ah uu leeyahay, sidoo kale loo yaqaano lacag-bixin dheeraad ah.
2. Haddii aad haysatid adeego lacag bixin ah kaliya kiiska (PSO),DCS waxay marka hore kaa celinaysaa lacag bixinada dheeraadka ah iyo lacag-bixinada laguugu soo diray si khalad ah ayagoo ka goynaysa qadarta lacag-bixinada mustaqbalka ee adiga laguu qabtay. Sharciga RCW 26.23.035(3) wuxuu ogol yahay tallaabadan ayadoon adiga ogeysiis lagu siin.
   a. DCS waxay si otomaatik ah kaaga goynaysaa boqolkiiba 10 lacagbixinada taageerada hadda la joogo ee mustaqbalka.
   b. DCS waxay si otomaatik ah kaaga goynaysaa boqolkiiba 100 lacag-bixinada taageerada ee hore wakhtigeeda loo soo dhaafay mustaqbalka.
3. DCS waxay qaadi kartaa tallaabooyin ururin kale ee uu ogol yahay sharciga RCW 74.20A.270 si ay dib kaaga qaado lacag bixinada dheeraadka ah iyo lacag-bixinada adiga laguugu soo diray si khalad ah. Tani waxaa la adeegsan karaa xataa marka aad joojisid in aad ka heshid lacag-bixinada taageero ee loo marayo DCS. Haddii DCS ay doorato ikhtiyaarkan, DCS waxay bixinaysaa ogeysiis adiga kugu saabsan. Haddii wax diidmo ah aanan la keenin, DCS waxaa loo oggol yahay in ay :
   a. U dirto loo-shaqeeyahaaga ama qofka kale ama hay'adda kuu haysa hanta adiga Amar Dakhli Looga Goynayo Taageero. Amarka / Ogeysiiska wuxuu ka doonayaa loo-shaqeeyahaaga ama qofka kale ama hay'adda in ay ka goyso qadarta lacag-bixinta ee khaladka ah iyo / ama lacag-bixinada dheeraadka ah ee kasbashadaada, dakhliga, iyo hantida.
   b. Ka gudbiyaan rahaamad hantidaada shakhsiyeed ama maguurtada ah.
   c. Adeegsato xal ururineedka DCS kasta ee la heli karo ee hoos imaanaya Cutubyada 26.09, 26.18, 26.23, iyo 74.20 RCW.

Macluumaad Qabiil

Iyadoo ay ku heshiiyeen xafiiska DCS iyo qabiilku mooyee, meelmarinta xafiiska DCS iyo hababka aruurinta ee ku liis-gareysan foomkan kuma dabbaqmi karaa shaqaalaha u shaqeeya qabiilooyin, iyo meheradaha ay leeyihiin qabiilooyinku ee ku yaalla xeryaha qabiilooyinka. Haddii waalidka aan ilmaha haynini yahay shaqaale qabiil hindi ah, amase yahay meherad qabiilku leeyahay, amase meherad qabiil leeyahay oo ku taalla xero qabiil, waxa laga yaabaa xafiiska DCS:

1. Uu warsado qabiilku inuu meelmariyo amar taageero. Xafiiska DCS wuxuu taas sameyn doonaa haddii dawladda Gobolka Washington iyo Qabiilku leeyihiin nidaam sidaas lagu sameeyo.
2. Wuxuu maxkamad qabiil ka feyl-gareyn doonaa hawl-gal lagu dhidbayo amase meelmarinayo amarkaaga taageero. Haddii xafiiska DCS ka feyl-gareeyo hawl-gal maxkamad qabiil, waxa laga yaabaa in xafiiska DCS isticmaalo habab lagu qeexay heshiisyo dhexmaray Dawladda Washington iyo Qabiilada Hindida ah amase uu isticmaalo hababka jira ee ma xkamad qabiil.

Waxa laga yaabaa in Xafiiska DCS uu kiiskaaga u gudbiyo unug meelmarin ee qabiil haddii waxyaalaha soo socda mid ka mid ah uu dabbaqo kiiskaaga.

1. Labada dhinac ee amarkaaga taageero amasecarruurtaadu ay xubno ka yihiin qabiil Hindi ah.
2. Waalidka aan ilmaha haynini uu shaqaale u yahay Qabiil Hindi ah, meherad hindi-leedahay, amase meherad Hindi-leedahay oo ku taalla xero Hindi ama dhulka Ilaalinta ah.
3. Koox kasta oo ka qayb-gala amarka taageerada ayaa hoos yimaad hab-socodka iskaashatada taageerada ilmaha ama heshiiska.
4. Koox kasta oo ka qayb-gala amarka taageerada ayaa helaya adeegyada TANF Qabiileed ama narnaamijka taageerada Qabiileed.
5. Keeskaaga ayaa ku shuqul leh arrimaha kale ee qabiileed.

Sharciyada iyo Siyaasadda Saameysa Taageero Ilmo

Cutubyada soo socda ee Xeer Dib-loo-qoray ee Washington(RCW) iyo Xeer Maamuleedka Washington (WAC) ayaa xukuma adeegyada uu bixiyo xafiiska DCS.

Cutubka 26.09 RCW Cutubka 388-14A WAC
Cutubka 26.18 RCW
Cutubka 26.21A RCW
Cutubka 26.23 RCW
Cutubka 74.20 RCW
Cutubka 74.20A RCW

Waxa laga yaabaa in xeerka xaddidaadu dabbaqo deynta taageero ilmo. Haddii ay khuseyso, waxa laga yaabaa in waalidka aan ilmaha haynin isticmaalo xeerka xaddiddaada si difaac ah oo deynta in aan lagu laheyn wax deyn ah dhamman amase qeyb ka mid ah deynta taageero.

Wacitaanno Taleefan

Waxaad wacdaa nidaamka taleefanka otomaatika ah ee 800-442-5437 si aad u hesho macluumaad ku saabsan kiiskaaga. Fadlan inta aad kari kartid isticmaal nidaamkan. Haddi aad haysato arrin aanu wax ka qaban karin nidaamka “KIDS”, wac xafiiska DCS ee gacanta ku haya kiiskaaga. Xusuusnow, wicitaannada taleefanka ayaa ka qaata wakhtiga shaqada kale ee wax arururinta kale ee kiiskaaga. Yareyn tirada wicitaanadaadu waxay u oggolaaneysaa xafiiska DCS inuu ka sii fiican kuugu adeego.

Haddi ay qasab tahay inaad la xiriirto xafiiska DCS, waxaad isticmaashaa lambarada taleefan ee hoos ku liis-gareysan. Fadlan taleefan lambarka bilaashka ah u isticmaal wicidda meel fog oo qura. Waa la heli karaa Adeegyada TTY/TDD ee loogu tala galay dadka hadal amase dhaga culus.

Seattle:	(206) 341-7000 ama (800) 526-8658	Vancouver:	(360) 696-6100 ama (800) 345-9984
Tacoma:	(253) 597-3700 ama (800) 345-9976	Wenatchee:	(509) 886-6800 ama (800) 535-1113
Everett:	(425) 438-4800 ama (800) 729-7580	Yakima:	(509) 249-6000 ama (800) 441-0859
Spokane:	(509) 363-5000 ama (800) 345-9982	Olympia:	(360) 664-6900 ama (800) 345-9964
Kennewick:	(509) 374-2000 ama (800) 345-9981		

Macluumaad ku saabsan lacag-bixinno elektaroonik ah, wac 800-468-7422 amase soo booqo barta internetka ee xafiiska DCS ee www.dshs.wa.gov/dcs. Waxaad iska diiwaan-galin kartaa bartaas internetka ah ee https://secure.dshs.wa.gov/dcsonline/.si aad uu fiiriso taariikhda lacag-biximaha kiiskaaga.

Qofna lama takoori karo xag shaqaaleyn, adeegyo, amase dhinacyo kale hawlaha barnaamijkan iyadoo sabab looga dhigayo jinsiyad, qowmiyad uu ka soo jeedo, millad, diin, lab/dheddig-nimo, da', amase naafanimo. Haddii la codsado, waxa la heli karaa foomkan oo hab kale u qoran.